

WAA DIIWAANGELIYAY, MAXAA XIGA?

Marka ardayga la aqbal, waa inuu go'aan ka gaaraa inuu jeclaan lahaa inuu dhigto U of M. Haddii uu rabo inuu noqdo #FutureGopher, waxaa looga baahan doonaa inuu *xaqiiyiyo isqoristiisa*, oo ay ku jirto bixinta khidmadda xaqiijinta.

Labada bilood ee soo socda waxaa jiri doonna hawlo badan oo la dhammaystirayo iyo waqtiyo kamadambeys ah oo muhiim ah oo ay tahay in la xusuusto. Haddii aanu nahay *U of M*, Waxaan rabnaa inaad ogaato macluumaadka soo socda kahor inta ardaygaagu uusan si rasmi ah u noqon arday dhigta kulliyada:



Ogow go'aanka diiwaangelinta

Kahor ardaygu inta uusan xaqiijin isqoristiisa, waa in la *diiwaangeliyaa*. Ardaydu waxay heli doonaan *go'aanka diiwaangelintooda* iyadoo ay ku xirantahay marka ay codsadeen:



- **Waqtiga Kamadambeysta ah ee Tallaabada Hore ee 1-aad:** haddii la gudbiyo ugu dambeyn 1-da Nofeembar, ardaydu waxay go'aan ka heli doonaan arjigooda ugu dambeyn 31-ka Janaayo.
- **Waqtiga Kamadambeysta ah ee Tallaabada Hore ee 2-aad:** haddii la gudbiyo ugu dambeyn 1-da Diseembar, ardayda waxay go'aan ka heli doonaan arjigooda ugu ka dambeyn 15-ka Febraayo.
- **Waqtiga Kamadambeysta ah ee Caadiga ah ee Arjiga:** haddii la gudbiyo ugu dambeyn 1-da Janaayo, ardaydu waxay go'aan ka heli doonaan arjigooda ugu dambeyn 31-ka Maarso.

Ardayda qaar ayaa la siiyaa go'aan ah *dib-u-dhig* ama *liiska sugida*. Ardaydaan waxay heli doonaan go'aanka diiwaangelinta ee ugu dambeeya taariikh cayiman:

- **Dib-u-dhig:** go'aankan waxaa kaliya loogu talagalay ardayda codsatay Waqtiga Kamadambeysta ah ee Tallaabada Hore ee 1-aad ama Waqtiga Kamadambeysta ah ee Tallaabada Hore ee 2-aad. Go'aankan macnihiisu waa inaan u baahannahay macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan codsadeyaasha kale kahor inta aynu go'aanka ugu dambeeya gaarin. Wargelin ayaa la bixin doonaa ugu dambeyn 31-ka Maarso.
- **Liiska sugida:** ardayga waxaa la geliyay liiska ardayda u-qalanta diiwaangelinta. Go'aankan macnihiisu waa inaan u baahannahay in aan xaqiijino inaan hayno boos bannaan iyo kheyraad ku filan oo ka jiro U of M kahor inta aynu bixinin diiwaangelinta. Wargelin ayaa la bixin doonaa ugu dambeyn bartamaha bisha Juun.

Kaqeybgal munaasabada ardayga la diiwaangeliyay



Munaasabadaha ardayga la diiwaangeliyay ayaa fursad u ah ardayda iyo qoysaskooda si ay ugu dabaaldegaan diiwaangelintooda U of M, oo looga jawaabo su'aalaha ay qabaan, oo ula xiriiraan ardayda kale ee imaanaysa. Munaasabadahaan waxay fursad u yihiin ardayda si ay wax uga dhageystaan *talo-bixiyahooda diiwaangelinta*, wax badan uga ogaadaan *noolsha kulliyada* ee U of M, una qaadaan *tallaabada xigta* ee xaqiijinta isqoristooda. Macluumaadka ku saabsan munaasabadahaan waxaa lala wadaagaa ardayda bilowga taariikh sannadeedka.

Xaqiiji isqorista



Kadib marka ardaygaaga la diiwaangeliyo, waxaa la joogaa waqtigii ay ka qabsan lahaayeen booskooda fasalka *ardayga cusub*. Marka la joogo Jaamacadda Minnesota Twin Cities, ardaydu waa inay xaqiijiyaan diiwaangelintooda iyagoo bixinaya khidmada xaqiijinta ah ee aan *celinta-lacageed laheyn*. Tallaabadan waxay na ogeysiinaysaa inay dhigan doonaan. Waqtiga kamadambeysta ah ee la soo gudbinayo khidmadan xaqiijinta ah waa 1-da Maayo. Lacagta waxaa lagu bixin karaa onlaynka barta z.umn.edu/confirm.

Codso hoy



Ku noolaanshaha dhismaha jaamacadda waa khibrad u oggolaaneysa ardayda inay ku noolaadaan meel u dhow fasallada, dhigaalada, iyo saaxiibada. Si kastaba ha noqotee, ku noolaanshaha dhismaha jaamacadda waajib ma ahan.

Haddii aanu nahay Jaamacadda Minnesota, waxaan dammaanad qaadnaa hoy ku yaalo dhismaha jaamacadda oo ku yaala *hoolalka la deggo*, oo loogu talagalay dhammaan ardayda cusub ee codsanayaan hoy ugu dambeyn 1-da Maayo. Ardayda codsata hoy kadib 1 Maayo looma balan qaadayo inay boos ka helayaan hoolalka hoyga.

Arjiga hoyga wuxuu furmayaa Nofeembar, waxaana laga heli karaa barta z.umn.edu/housingapp. Waqtiga kamadambeysta ah ee ay tahay in la soo gudbiyo arjiga hoyga waa 1-da Maayo. Marka la gaaro taariikhdan, ardaydu waa inay:

- Dhameystiraan oo soo gudbiyaan codsigooda hoyga
- Bixiyaan \$50 ee ah khidmadda arjiga hoyga
- Ka xaqiijiyaan isqoristooda Xafiiska Diiwaangelinta

U of M waxay ka bixisaa fursado hoy oo gaar ah oo katirsan *Bulshooyinka Ku Jira Noloshu Waxbarasho* (Living Learning Communities) halkaasoo ardayda isku asalka ah ama isku danta ah ay ku wada noolyihiin hoolalka la deggo. Ardaygaagu wuxuu ka heli karaa liistada LLC-yada barta z.umn.edu/LLCinfo.

U of M sidoo kale waxay barnaamijyo iyo dhigaalo u haysaa ardayda doorta inaysan ku noolaan dhismaha jaamacadda. Waxaan ku dadaalnaa inaan xaqiijino in ardayda *socdaasha* ay ka helaan shabakad dugsiga dhexdiisa iyo fursado ay kula kulmaan dadka kale ee isku danta yihiin.

Gudbi dukumiintiyada ugu dambeeya



Kadib qalinjabinta dugsiga sare, ardaydu waa inay u gudbiyaan warqada buundooyinka ee ugu dambeysay ee dugsiga sare Xafiiska Diiwaangelinta ee U of M, kaasoo xaqiijiya inay dhammayeen fasalkooda ugu dambeeyay ee dugsiga sare oo ay qalinjabiyeen. Ardaydu waa inay warqada buundooyinka dugsiga sare u soo gudbiyaan U of M ugu dambeyn 1-da Luulyo.

Haddii ardaygaagu doorto in si iskiis ah u soo weriyo natiijooyinka ACT ama SAT si dib-u-eegis loogu sameeyo iyagoo qayb ka ah arjigooda, buundooyinkooda rasmiga ah ee imtixaanka waa in la soo gudbiyaa ugu dambeyn 1-da Luulyo. **Fadlan ogow:** Jaamacadda Minnesota Twin Cities uma baahan doonto buundada imtixaanada ACT ama SAT ilaa arjiga 2027.

Dukumiintiyadaan ayaa muhiim inoo ah si aan u ansixino in ardayda ay si sax ah uga warbixiyeen buundooyinkooda iyo natiijooyinka imtixaanadooda ee ku yaala *diiwaankooda tacliinta la soo weriyay*. Haddii arday uu si khalidan uga warbixiyay darajooyinkiisa, ama uusan soo gudbin dukumiintiyadaan, diiwaangelintooda waa laga *noqon karaa*.

Dib-u-eeg kaalmada dhaqaale



Qiyaasta *xirmooyinka kaalmada maaliyadeed* waxaa la diraa guga. Ardayda buuxisa *FAFSA* ugu dambeyn *waqtiga kamadambeystaah ee mudnaanta leh* ee 1-da Maarso ayaa heli doonaan xirmooyinkooda rasmiga ah ee kaalmada maaliyadeed gudaha xagaaga. Xirmooyinkan waxaa ka mid ah waxyaabaha soo socda ee ardayda ka caawiya bixinta *lacagta waxbarashada*:

- **Deeqaha Waxbarasho:** ee loo siiyo ardayda sababo la xiriira tacliinta ama arrimo kale oo gaar ah. Looma baahna in dib loo bixiyo.
- **Deeqaha Lacageed:** oo ay bixiyaan dawladda, shirkadaha, hay'adaha faa'ido doonka aheyn, ama kulliyadaha. Looma baahna in dib loo bixiyo.
- **Deymaha:** ay bixiso dawladda. Waa in Idib loo bixiyo.
- **Barashada shaqada:** oo ay dawladdu u siiso ardayda qaab waqti-dhiman ah oo la damaanadqaaday, shaqada dhismaha jaamacadda iyadoo dugsiga la dhiganayo. Ardaydu waa inay iskood u raadsadaan, oo codsadaan, shaqooyinka barashada shaqo.

Ardayda u-qalma oo dalbadeen *MN DREAM Act* waxay la shaqeyn doonaan Xafiiska Tacliinta Sare ee Minnesota si ay u helaan qiyaasta abaalmarinta la bixiyay ee kaalmada maaliyadeed. Xirmooyinka kaalmada maaliyadeed ee U of M, oo ay ku jiri doonaan MN DREAM Act, ayaa loo diri doonaa ardayda u-qalanta gudaha xagaaga.

Waa muhiim in la ogaado in lacagta waxbarashada ay ka duwan tahay *kharashka dhigashada*, taasoo ah wadarta kharashka dhigashada kulliyada waxaana ka mid ah lacagta waxbarashada, balse sidoo kale waxaa ka mid ah kharashka *qolka iyo cuntada*, buugaagta, khidmadaha, iyo kharashyada kale.

ERAYADA MUHIIMKA AH

ENGLISH TERM	FASIRAADA EREYGA	QEEXITAANKA
Admissions Counselor	Talo-bixiyaha Diiwaangelinta	Xubin shaqaale ka ah kulliyad oo taageera ardayda inta lagu gudojiro safarkooda raadinta kulliyad
Admit	Diiwaangeli	Kulliyad ayaa dib-u-eegis ku sameysay arjiga ardayga waxayna oggolaatay inuu diyaar u yahay inuu ku guuleysto dugsigooda waxayna siisay dalab uu ku dhigto
Applications	Arjiyada	Foomka iyo dukumiintiyada ardaygu siiyo kulliyada si loogu tixgeliyo diiwaangelin
Commuter	Socdaale	Ardayga aan ku noolayn dhismaha jaamacadda isla markaana u lugeeya, u raaca baaskiil, gaadiidka dadweynaha ama gaari uu wato ku aado dhismaha kulliyada si uu u dhigto fasallada
Confirmation Fee	Khidmadda Xaqiijinta	Lacag ardaygu bixiyo si loo xaqiijiyo isqoristiisa
Confirm Enrollment	Xaqiiji Isqorista	Tallaabo ardaygu qaado si uu dugsiga ugu wargeliyo inuu dhigan doono. Tallaabadan waxaa ka mid ah bixinta khidmada xaqiijinta ee aan celinta-lacageed laheyn.
Cost of Attendance	Kharashka Dhigashada	Kharashka guud ee dhigashada kulliyada, oo ay ku jiraan hoyga, buugaagta, gaadiid-raaca, khidmadaha, iyo kharashaadka kale ee ardaygu inta badan galo markuu dhiganayo dugsiga
Defer	Dib-u-dhig	Jawaabta kulliyadda siiso codsadhaha tallaabada hore ee aan wali la diiwaangelinin iyadoo ugu wacan tahay in macluumaad dheeraad ah loo baahan yahay
Early Action Deadlines	Waqtiga Kamadambeysta ah ee Tallaabooyinka Hore	Waqtiga kamadambeysta ah ee ugu horeeya ee arjiyada ee u oggolaanaya ardayda inay helaan go'aanka hore ee diiwaangelinta. U of M waxay leedahay laba ah waqtiyada kamadambeysta ah ee Tallaabooyinka Hore. Go'aankan ma ku qabanayo.
FAFSA	FAFSA	Magaca la gaabiyay ee Codsiga Bilaashka ah ee Kaalmada Dawladda ee Ardayga, oo ah foomka dawladda ee xisaabiya inta ardaygu awoodi karo inuu ku bixiyo kulliyada. Xisaabintan waxaa isticmaasha Jaamacadda Minnesota si ay u bixiso abaalmarinta kaalmada dhaqaale.
Financial Aid Package	Xirmada Kaalmada Maaliyadeed	Caddada guud ee lacagta ardaygu helo si looga caawiyo inuu iska bixiyo kulliyada. Tani waxaa ka mid ah lacagta laga helo FAFSA, oo ay u bixiso jaamacadda, qaab deeq waxbarasho iyo barasho shaqo ahaan.
Freshman	Arday Cusub	Arday ku jira sannadka koowaad ee kulliyada
Housing Application	Arji Hoy	Tallaabooyinka ardaygu qaado si uu ugu noolaado hoolalka la deggo ee dhismaha jaamacadda. Codsigan wuu ka duwan yahay arjiga diiwaangelinta.
Living Learning Communities	Bulshooyinka Ku Jira Noloshaha Waxbarasho	Qabanqaabooyinka hoy ee U of M halkaasoo ardayda leh asal iyo dano isku mid ah ay ku wada noolaadaan meel u dhow hoolalka la deggo
MN DREAM Act	MN DREAM Act	MN DREAM Act wuxuu faa'iido u yahay ardayda aan sharciga laheyn oo ku sugan Minnesota ee buuxiyo shuruud gaar ah
Next Steps	Tallaabooyinka Xiga	Waxqabadyada ardaygu sameeyo kadib diiwaangelinta
Priority Deadline	Waqtiga Kamadambeysta ah ee Mudnaanta Leh	Waqtiga kamadambeysta ah ee la buuxiyo FAFSA si loo hubiyo in ogeysiinta aysan dib u dhicin
Regular Deadline	Waqtiga Kamadambeysta ah ee Caadiga ah	Waqtiga kamadambeysta ah ee ugu dambeeya ee arjiyada
Rescind	Ka Noqo	Xulasho kulliyadu sameyso si ay u baajiso diiwaangelin arday
Residence Hall	Hoolka La Deggo	Guryaha ardaydu seexato ama guryaha kale ee lagu noolaado ee ay kulliyada bixiso
Room and Board	Qolka iyo Cuntada	Lacag kulliyadu ku dallacdo ku noolaanshaha iyo ku cuntaynta hoolka la deggo
Self-Reported Academic Record	Diiwaanka Tacliin ee La Soo Weriyo	U of M waxay ardayda ka dooneysaa inay uga warbixiyaan natiijooyinka imtixaankooda iyo dhibcaha dugsiga sare gudaha arjigooda - taasoo macnaheedu yahay inaysan u baahnayn inay keenaan dukumiintiyada rasmi ah ilaa iyo inta laga diiwaangelinayo. Fadlan ogow: Dhibcaha imtixaanada ACT/SAT looma baahna in lagu qoro arjiga 2027.
Tuition	Lacagta Waxbarashada	Lacag kulliyada ku dallacdo casharrada iyo isticmaalka dhigaalada laga helo dhismaha jaamacadda. Caddada ardaygu bixiyo waxay ku xiran tahay kaalmada dhaqaale iyo xaaladooda joogitaanka gobolka ama ka baxsanaanta gobolka.
U of M	U of M	Magaca la soo gaabiyay ee Jaamacadda Minnesota Twin Cities
Waitlist	Liiska Sugida	Kulliyada ayaa ku meeleysay arday liiska ardayda kale ee u-qalanta diiwaangelin balse wali lama diiwaangelin sabab la xiriirta boosaska oo xaddidan



//